# Xeerka Nabad geliyadda Guud

**Sharci Lr, N- 21**

**Agoosto 16-1963.**

## Qeybta 1aad

## Xeerka Guud

## Madaxa 1aad

Xubnaha Nabad Geliyada Guud & Awooda.

Qod. 1aad

Waajibaadka Hay'adda Nabad Geliyada Guud Hay'adda Guud Waajibaadkeeda waxaa ka mid ah:-

- ✓ {A}. Anshaxa Guud Sugida Nabad geliyadda Guud.
- ✓ {B}. Inuu Diyaariyo si waafaqsan Sharciga Qaabka ka hortaga Dembiyadda iyo Ciribtirkooda.
- ✓ {C}. Gacan Gar-gaar ka siiyo Xaaladaha Danta Guud & mida Gaar ahaaneed Masiibooyiinka.
- ✓ {D}. Wadda Shaqeynta dhexe Marta Hay'adaha nabad geliyadda si loo sugo ilaalinta Sharciga & Xeerarka Guud, & Go'aanada ka soo baxa Hay'adha & Go'aanada ka soo baxa Hay'adaha Dowladda Ee Awoodka u leh.

### Qod. 2aad

### Hay'adda Nabad geliyadda Guud.

1. Sida uu Qabo Xeerkaan Hay'adaha Wasiirka Arimaha Gudaha ee hoos yimadaan Taliska Ciidanka Booliska, Guddoomiyayaasha Gobolada oo ay hoos yimadaan Taliska Booliska Gobolka iyo Qeybaha Birmadka Booliska & Ilaalada inta ku siman Xeerka u degsan.

{C}. Guddoomiyayaasha degmooyinka & Wakiiladaha Degmooyinka Ee Hoos imaanayaan Taliyaasha Saldhigyada Booliska Birmadka Booliska Ilaalada ee heer degmo inta ku siman Xeerka u degsan.

2. Marka uu Maqnaado Ama Xaaladda ay soo daristo Guddoomiyaha degmadda & wakiilka degmada howlaha hay'adda nabad geliyada guud waxaa si ku meel gaar ah u qabanaayo Taliyaha Saldhiga booliska Ee Awoodka u leh

3. Hay'adda ku xusan Xarafka B, & C, Ee, F, 1aad, waxay awoodaan inta ku siman Xuduuda sharciga inay weydiistaan ayadoo Loo maraayo Wasiirka Arimaha Gudaha inay soo dhex galaan Ciidanka Ilaalada Birmadka Canshuuraha Ciidanka X,D,S, iyo Xoogaga kale ee Ciidamadan u yeelka ah ee dowladda si loo fuliyo Waajibaadka ku xusan Qod, 1aad,Hadii ay

- dhacdo baahi deg deg ah lalana Tashado Taliyaha Ciidanka Booliska Ee Goobta Codsiga waxaa soo jeedin karaa si toos ah, Hay'adda kor ku xusan ee ku socota Taliyayaasha Ciidanka , Ilaalada Canshuuraha , Birmadka , Ciidanka X,D,S, & Xoogaga kale ee Ciidanka u Yaalla ah Dowlada ayadoo si deg deg ah Ogeysiin loo siinaayo Wasiirka Arimaha Gudaha

## Madaxa {2}

## Qod. 3aad.

## Go'aanada Gudiga Nabad geliyadda Guud.

- Gudiga Nabad geliyadda , inta ku siman sharciga waxey soo saari karaan Go'aano lagama Marmaan ah ee wax tar u leh Fulinta Waajibaadka ku xusan Qod, 1aad.

### Qod. 4aad.

1. Fulinta Go’aanood Gudiga Nabad geliyada waxay leeyihiin Awood Fulineed.
2. Hadii ay fulin waayaan aan dalka ay khuseyso Wargelin kadib waxaa laga Qaadi karaa Talaawooyiin, wixii kharash baxana ay dushooda tahay si loo fuliyo Go’aanada Xaafis ahaan.

### Qod. 5aad
### Fasaxid

1. Fasaxyada ay bixiso Hay’adda Nabad Geliyadda Guud waa mid shaqsi ah sina uguma gudbi karto cid kale mana dhali karto xiriir shaqo ku saleysan wakaalad.

### Qod.6aad

- Xadaynta Ogolaashada Ruqsada, hadii uusan jirin Xeer ka duwan Ogolaashada Ruqsada ku qoran Qodobka hore waxaa suura gal ah in la diido :-
- {A}. Hadii Qofka ku dhacay Xukun Dambi oo aan aheyn mid kama ah oo Ciqaabtiisu gaareyso Hal Sano oo Xarig ah.
- { B}. Ama Qof la saaray Ilaalin iyo Dabagal oo ay ku cadaatay inuu yahay dambi caadayste ama shaqa ka dhigte.

### Qod. 7aad

### Kala Noqoshada ama ka joojinta Ruqsada.

- Ruqsada waa in lagala noqdaa Hadii qofka ruqsada la siiyey oo ku baaqsaday kulligeed ama Qayb ka mid ah wixii loo fasaxay, ama laga doonaayey fulin ahaan, ama aan dhowrin Xaaladaha Nidaamku faraayey ama uu Wakiilkiisu Awood Maroorsi sameeyey.

## Qod. 8aad

## Waqtiga Fasaxa ama Ruqsada

- Hadii aan Xeerku si kale u sheegeyn ama lagu cadeyn Ogolaashada ruqsada waa in ay ahataa hal sano laga bilaabo Maalinta la bixiyey.

## Qod. 9aad

## Ka Cabasho

1. Ka Cabashada Go’aanada Ee dhexmara Madaxda Amniga iyo Dadka waa la ogol yahay ayadoo loo maraayo Jidka silsiladda Qaanuuniga ah muddo 30 Cisho laga bilaabo maalinta la ogeysiiyey go’aanka
2. Codsiga ma leh wax howl joohin ah
3. Ka Cabashada ay dhexmartay waqtigii qaanuuniga ahaa ee hay’adaha Amniga waxaa looga dacwoonayaa oo cabashada loo gudbinayaa Maxkamadda Sare si uu dhigayo sharcigu.

## Qod. 10aad

## Awood u Lahaashaha Xerida Goobo Gaar ah.

- Hadii ay jirto Baahi deg deg ah Hay’adaha Nabad geliyadu Saraakiisha Boliiska , & Canshuuraha Ilaalinta Maaliyadda, waxey awood u leeyihiin iney xeraan saacadkasto goobaha tilmaaman ee ganacsi si loo xaqiijiyo waajibaadka saaran ee sharciga ah iyo Qaanuunka.

## Qod. 11aad

## Ka hore imaasho go’aanka Hay’adaha Nabad geliyada & Qanuunka.

1. Cid kasto oo looga yeero lana gaarsiyo qoraal lagu yeeraayo in hor yimaado xafiisyada hey’adaha amaanka sababaha la xeriira howlaha ku xusan Qodobka 1aad ee sharcigaan, oo ku imaanweysa waqtigii

loo yeeray cudur daar la'aan, hadii imaasho la'aantaasu aysan wehlin Dambi ka culus waxaa lagu ciqaabayaa 15 beri oo Xarig ah & 100 shilin soomaali.

## Qod. 12aad

## Tilmaan Qaadasho

1. Taliska Ciidanka Booliska wuxuu Awood u leeyahay Xafiiskiisa Tilmaan uga qaato Dadka sida qofka faraha laga qaado marka dacwado laga qoraayo ama qofka la baaraayo.
2. Waxey Awoodaan oo kale in qofka la sawiro Lana sajilo dadka ay sugnaanta inuu ku dhacay xukun hore dambi ciqaabtiisu ay gaareyso 3 sano ama qof loo aqoonsaday ku cadeystay dambiyada ama qof diiday inuu shaqsiyadiisa cadeeyo.

## Tiitalo II

## Qod. 13aad

## Isu imaasho & Xaflado (Shirar).

1. Dadka Sameynaayo shirarka isu imaashaha & Xafladaha Goobaha Dadweynaha u furan waxaa waajib ku ah iney 3 maalmood ka hor ogeysiiyaan Guddoomiyaha Degmadda .
2. waxaa loo qaadanayaa isu imaashaha hadii xataa tahay mid qaas ah oo meel gaar ah lagu qabanaayo iyo tirada dadka isugu imaanaayo waxaa soo dhex geli karta Arimo ay ayagu daneynayaan oo siyaasadeed.
3. Waxaa loo aqoonsanayaa isu imaashaha shirarka caadiga ah oo ay qabsadaan ururada siyaasada fadhiyadooda hadaysan aheyn kuwa kongareyska kuwa Goboleed ama Qaran.
4. Sababo Guud Awgood, mid caafimaad, mid qatareed, mid dhaqmeed mid Amaan, darteed, Guddoomiyaha degmadda wuxuu awood u leeyahay in uu qoraal ahaan ku joojiyo shirarkaas Goobaha lagu qabanaayo asagoo sababeynayo waa inuu ogeysiyaa Guddoomiyaha Gobolka.

### Qod.14aad

### Xusas Diimeed Ama Siyaaro

Qodobadaas hore loo raaci mayo xusdiimeedyada ama Duugta lagu qabanaayo Meel banaan ah ama meel gaar ah.

### Qod.15aad

### Hub u soo qaadasho Goobaha laysugu Yimaado.

1. Waa Madnuuc in lala yimaado Goobaha laysugu Xataa hadii qof uu heysto ruqsada hubka heysashadiisa.
2. Guddoomiyaha Degmadda wuxuu awood u leeyahay inuu u fasaxo qof gaar ah inuu hubkaas la tago Goobta laysugu imaanaayo dhaqan ahaan.

### Qod.16aad

### Kala dirida isu imaashaha dadweynaha

- Hadii aan wargelin loo heyn ama aysan dhowrin amaradda ku xusan Qodobka 13aad ee isugu yimaada goobaha dad weynaha ama dadweynaha u furan ama banaanbaxyo sameeya , iyo Buuq, Qaylo, oo Qatar geli kara Nabad geliyada amaanka & Dadweynaha ama isugu imaashahaas dambi ka dhasho waa laka dirayaa.

### Qod.17aad

### Qaabka loo raacayo kala dirida dadweynaha isu yimid

1. Sida ku xusan Qodobka hore marka lakala diraayo isumaasho dadweyne dadka isu yimid waxaa loogu yeerayaa iney kala takaan kana dhaqaaqaan goobta magaca sharciga dartiis & magaca hay'adda nabad geliyada guud darteed.
2. U yeeris kadib dadka ku hara goobta hey'addu waxey amreysaa in lakala diro oo 3 nooc ah
   - { A} Cabsi Gelin
   - ( B} Digniin

- { C} Kala Kaxeen

3. Kuwa intaas ku tagi waaya waxaa loo isticmalayaa xoog ama diidada darteed waana la xerayaa

**Qod.18aad**

**Martiqaadyada**

- Waxaa loo isticmaalayaa meelaha dadweynahu isu yimaadiin Sida jidadka, & Goobaha Furan, dadweynaha waxaa loo raacayaa sida isu imaashaha shirarka guud

**Qod.19aad**

**Dhar gaar ah, Calaamadaha, Bilado**,

1. Waa ka xaraam inuu qof qaato calaamadahaas oo ka tirsaneyn ciidamada Qalabka sid, ama kuwa u shaqeeya sida militeriga, in ay qaatan labiskaas aan ka duwaneyn kuwa Ciidamada, si ay u isticmalaan
2. Guddoomiyaha Degmadda wuxuu soo saarayaa go'aan uu ku madnuucaayo ina la qaato labiskaas dadweynaha dhaxdiisa dhar ahaan, calaamad ahaan, ama Calan ahaan, sida uu asagu u arko hadii ay keen karto iney nabad geliyada wax u dhibaan

**Qod.20aad**

**Ku Xad gudub amarada isu imaashaha martiqaadyada ama soo dhaweynta**

1. cid kasto oo ku xad gudubta amaradaas hadii aan dambi ka culus ka dhalan qeybta hore ee sharcigaan waxaa lagu ciqaabayaa 3 bilood oo xerig ah & 750 shilin soomaali oo ganaax ah
2. hadii hub lala yimid goobtaas fasax ahaan hubkaas waa lala wareegayaa.

**Qod.21aad**

**Hubka**

1. Qeybaha Hubka sida sharcigaan ku qoran, hub waxaa loola jeedaa
   - { A}. Qabka Qarxa & wixii la xariira sida risaasta,

- ✓ { B}. Hubka Afka leh & kan wax jara & shaykasta oo awooda in wax lagu dhaawaco
- ✓ {C}. Bambooyiinka & waxyaalaha Holca oo ay jiraan waxa wax qarxiya , Gaaska dadka ka ilmeysiya ama Qufaca ku rida

## Qod. 22aad
## Sameynta Uurushahada & ka gacansiga Hubka

1. Sameynta Hubka Ururrsashadiisa, ka ka gacansigiisa, ee ku xusan qeybta { A}, { C} ee qodobka hore waa madnuuc ayadoo laga heysan fasax wasiirka arimaha gudaha
2. Sameynta ururinta & ka ganacsiga, dayactirka, hubka ku xusan Xarafka ( B) ayadoo fasax laga haysan Guddoomiyaha degmadda
3. Fasaxa ku qoran qeybta hore waxaa la bixinayaa marka la soo baaro goobta shaqada iney tahay goob u qalanta oo aan amaanka bulshada wax u dhimeyn.

## Qod.23aad

## Dhoofinta & Soo Dejinta Hubka

- Wixii ka duwan ciidamada qalabka sida oo la xariira ka ganacsiga dibada, soo dajinta, dhoofinta hubka, waa iney la hadaan fasax uu bixinaayo wasiirka arimaha gudaha.

## Qod.24aad

## Diiwaan Gelinta Dhaqdhaqaaqa Hubka.

1. Warshadleyda & Ganacsatada Hubka & cid kasto hubka u uurisa ama warshadlayda dayactirka hubka ama sii iibisa waxaa qasab ku ah iney leeyihiin diiwaan howlmaalmeed ee dhaqdhaqaaqa hubka

oo ay ka muuqato taalbo kasto oo la qaado qofka magaciisa, gurigiisa, & waxa uu ku qabanaayo hubka.

2. Diiwaankaas waa in la tusaa marka ay u baahdaan hay'adaha amaanka, saraakiisha, saraakiil xigeenada, Ciidanka Booliska,
3. Waa madnuuc in la iibiyo nuuc kasta hub, qof shacab ah oo aan haysan fasax ay soo siiyeen hay'adaha Awooda u leh

## Qod.25aad

## Safrinta Hubka ama Qaadida

1. Dadka lagu soo sheegay Qeybta hore ee Qodobka hore markasto oo ay sameynayaan dhaqdhaqaaq hub, waxaa waajib ku ah in ay la socodsiiyaan Taliyaha Saldhiga Booliska Degmadda, ayagoo tilmaamaya goobta loo wado si loo ilaaliyo Amniga Taliyahuna Qaabka loo raacayo Aasag ayaa dajinaayo.

## Qod.26aad

## Ka Ganacsiga Hubka lala wareego Suuqa Madoow.

1. Hub in lagu iibiyo suuqa madoow waa madnuuc, sida ku xusan xarafka (A) (C) Ee Qodka 21aad, Ee Sharcigaan.

## Qod.27aad

## Haysashada Hubka & Qaadashada

1. Wixii ka duwan warshadleyda hubka ganacsatada hubka & kuwa leh warshadaha lagu dayactiro hubka , ma qaadan karaan hadii aysan haysan fasax hay'adaha Awooda u leh sida ka muuqata Qodobada Soo Socda.

2. Madnuucida hubka ma saameyneyso.
   - ( A). Ciidamada Qalabka sida

- ( B). Dadka haysta hubka aan wax dilin ee ruwaayadaha lagu dhigo
- ( C). Hay'adaha Amaanka
- ( D) Xeer ilaaliyaha Guud & ku xigeenadiisa

3. Hubka ku xusan xarafka B waa in lala socodsiiyo Taliyaha Booliska Ee Deegaanka

**Qod. 28aad**

**Fasaxa & Haysashada Qaadashada Hubka**

- Guddoomiyaha Gobolka wuxuu Awood u leeyahay dadka degan gobolkiisa inuu siyo fasax, inta gobolkiisa ku eg, hadii ay soo codsadaan ayagoo soo maraya Gudoomiyaha degmadda Leesinka Fasixida, Qaadashada, & Haysashada hubka hoos ku qoran.

  - (A). Qoriga Dagaal oo aan Otamaatig aheyn.
  - (B) Qoriga Ogaarsiga.
  - (C) Bastoolad.

**Qod.29aad**

**Ruqsada Hubka Afka leh ama wax gooya ee lagu qaato magaalada dhaxeeda**

1. Guddoomiyaha Degmadda wuxuu fasax siin karaa dadka deegaankiisa laysin ay ku qaataan hubkaas deegaankiisa gadaheeda, sida ku xusan Xarafka ( B) Ee Qodka 21aad ee sharcigaan
2. Cidna loogama Baahna Fasax haysashada hubkaas guriyaha gudahooda yaala
3. Sidoo kale magaalada Banaankeeda inaad ku qaadato hubkaas fasax loogama baahna.

**Qod.30aad**

**Xaaladaha Gaarka ah ee hubka lagu qaadan karo ama qof loogu dhiibi karo marka ay jirto xaalad deg deg ah**

- Qatar weyn marka ay soo wajahdo nabad geliyadda guud & amaanka, hay'adaha Amaanku waxey si ku meel gaar ah u hubeyn karaan dadka haysta fasaxa hubka & kuwa aan haysan waana ka qaadi karaan hubka dhamaantood, sababo amaan darteed.

## Qod.31aad

### Fasaxa Hubka dadka safarka ku yimid wataan oo dowladda shisheeye bixisay

1. Fasaxa hubka oo ay bixiyeen dowladdo shisheeye oo uu wato qofka sacoto ku ah dalka soomaaliya, waa la siin karaa mido ku meel gaar ah oo aan ka badneyn 3 bilood, sida hubka qarxa, sida qoriga Bastoolada, waxaana bixinaayo Guddoomiyaha gobolka.
2. Hubka Afka leh ama wax muda waxaa bixinaayo guddoomiyaha degmada

## Qod. 32aad

- Bixinta Canshuurta iyo diiwaan gelinta Ruqsada haysashada iyo Qaadashada hubka waxey ku xiran tahay inaad bixiso Kharashka uu Qoraayo sharcigu

## Qod.33aad

- Hubka loo bixiyey sabab sharafeed waa Madnuuc, hubkaas dowladu u bixisay Sabab sharafeedka in lagu wareejiyo ama loo dhiibo qof kale.

## Qod.34aad

### Xaaladaha Ciqaabta

1. Kuwa ku xad gudba xeerkaan, qeybtiisaan hubka hadii aan falkaasi uuna keeneyn dambi ka weyn waxaa lagu ciqaabayaa 3 bilood oo xerid ah & 750 Shilin So oo ganaax ah
2. Nuuca hubka ku xusan ( A) & ( C) ee Qodka 21aad sharcigana oo aan haysan fasax waa lagala wareegayaa

**Qod.35aad**

**Sameynta wax yaabaha Qarxa ama keena neefqabad Qatar ku ah Nolosha Dadka**

1. Marka laga soo tago waxyaabaha ku xusan Qeybta 2aad Ee Tiitolahaan waa madnuuc ayadoo aan fasax laga haysan wasiirka arimaha gudaha soo saarid & haysashada ka ganacsiga & Qaadida waxyaabaha qarxa, ama Neefqabateeya Qatar ku ah nolosha dadka.
2. Marka fasax la bixinaayo arintaan la xariira wasiirka arimaha guduhu wuxuu magacabayaa gudi farsamo oo tignikaal ah oo soo xaqiijiya ka gacansiga waxyaabahaas dhoofintooda soo dajintooda si looga ilaaliyo Qatar dadweynaha uga timaada goor kasto howlahaas la qabanaayo.

**Qod.36aad**

**Dhoofinta & Soo Dajinta waxyaabaha Qarxa.**

- Waxaa xadeynaya wasiirka arimaha gudaha, marka laga reebo ciidamada qalabka sida, ganacsata ku howoolan dhoofinta iyo soo dajinta waxyaahaba qarxa ama suntan dadka neefqabataysa oo Qatar ku keeni karta nolosha dadweynahawaa in fasax looga qaato wasiirka arimaha gudaha

**Qod. 37aad**

**Xaaladaha Ciqaabeed.**

- Kuwa ku xad gudba labada Qodob oo hore waxaa lagu ciqaabayaa 6 bilood oo xeriga & 2000 sh. So oo ganaax ah

## Qod.38aad

Baabi inta iyo tirtirida waxyaabaha Qarxa & Neefqabteynta keena

**1.** Wasiirka arimaha gudaha wuxuu awood u leeyahay inuu amro in la baa'biyo ama la tirtiro waxyaabaha qarxa & kuwa neefqabataynta keena oo Qatar ku ah nolosha dadweynaha, oo yaalaha warshadaha Keydka iyo baqaarada iibka oo aan fasax loo haysan

## Qod. 39aad

**Hubka Feestooyinka la rido ee keeni karo Qatarta**

1. Fasax la'aan lama isticmaali karo waxyaabaha qarxa ama ifa oo shanqartooda dadweynaha dhibsanayaan, qaasatan deegaan u dhow jidadka iyo goobaha kale.
2. Madnuucidaas masaameyneyso Feestooyiinka Dadweynaha & kuwan Diimeed, hadii aan gudoomiyaha degmada si kale u arkin

## Qod.40aad

**Dab shidida**

**1.** Waa Madnuuc in dab laga shido meel 100 mitir ka yar u jirta keydka shidaalka, Goobaha , Baaruuda lagu keydiyo iyo waxyaabaha qarxa

**2.** Marka meelaha dab laga shidaayo waxaa lagama maarmaan ah taxadar dheeri ah qofka meesha is ka leh iyo kana shidaaya in ay heystaan awood iyo tiro looga hortagi karo inta dabku ka damaayo.

## Qod. 41aad

- Dadka ku Xad Gudba labada Qodob ee hore waxaa lagu ciqaabayaa Hal Bil oo Xerig ah Ganaax dhan 1000.Sh. So

## Qod.42aad

## Warshadaha Shanqara.

- Marka lagu tago Qaybaha ku xusan II-III Artikalka warshadaha wax lagu sameeyo oo keena shanqar ama bixiya Xiiq, waa in loo xadeeyaa Goobo u gaar ah oo leh Xeerar iyo Qanuun si loo dhowro degnaashaha deegaankan.

## Qod. 43aad

## Goobaha Shaqadda Ee leh Shanqarta Dadka Dhibta

- Goobaha looga shaqeeyo waxyaabaha shanqara oo la dhibsanaaayo waa in shaqadooda la joojiyo Saacadaha Nashashada dadka hadii aysan jirina waa in Guddoomiyaha Degmadda waqti xadeyaa.

## Qod.44aad

## Shineemooyinka & Tiyaataradda

- Masameyn karaan Soo Saarida filimadda iyo riwaayadaha hadii aysan heysan Ogolaashaha ku xusan Qod. 520-521 XCS.

## Qod. 45aad

## Gudiga Qaabilsan Faafreedka Filimadda

1. Wasiirka warfaafinta oo xiriir la yeelanaaya wasiirka arimaha gudaha waxay magacabayaan gudi faafreed fadhigoodu yahay muqdisho oo guddoomiye u yahay sarkaal wasaaradda warfaafinta ka mid ah , sarkaal ka mid ah wasaaradda arimaha gudaha & sarkaal ka mid ah wasaaradda waxbarashadda, iyo labo qof oo ka mid ah dadweynaha oo u magacaabaayo wasiirka warfaafinta
2. Gudigana waxey awood u leeyihiin iney joojiyaan filimadda iyo riwaayaddaha wax u dhimaaya dhaqanka iyo nabad geliyadda guud ama ka soo horjeeda qaran nimadda, waxey qoraal ahaan ugu soo gudbiyaan cidda wadata Guddoomiyayaasha Goboladda waxey awood u leeyihiin iney riwaayaddaha iyo filimadda Qaarkood ay ka

reebaan dadka da'dooda ka yartahay 15 sano ayadoo milkilaha ama tiyaatirka ogeysiis ku soo dhajiyaan al-baabka shineemadda ama tiyaatarka, in aan da'daas ah aysan soo geli Karin

3. Wasiirka warfaafinta wuxuu awood u leeyahay howlshaas inuu u wakiisho Guddoomiyayaasha Gobolka & degmooyiinka meelahaas Madaxda ka ah
4. Cidii go'aankaas dacwad ka qabta oo gudiga howlahaas ka cabaneysa gudoomiyaha Gobolka iyo Guddoomiyaha degmadda waxey u soo gudbin karaan dacwadooda wasiirka warfaafinta

## Qod.46aad

## Sharciga Ciqaabta

**1.** Kuwa ku xad gudba xeerkaan ay tilmaamayaan, Qodobada Hore waxaa la xirayaa 6 bilood oo xarig ama 3000 sh. so oo ganaax ah.

## Qod. 47aad

## Tartamadda Isboortiga

- Dadka Fulinaayo Tartamada isboortiga Goobaha Dadweynaha waxaa qasab ku ah iney Fasax ka qaataan Guddoomiyaha deegaanka

## Qod.48aad

## Ilaalinta Goobaha Tartamada isboortiga & Shineemooyinka

1. Ciidamadda Nabad geliyada waxey ilaalinayaan Tartamada isboortiga & shineemooyiinka sida ku xusan Qodobada aan soo dhaafnay si ay u dhowraan amaanka guud habsami u socodka howladaas
2. Hadii la dareemo wax wax u dhimaayo nabad geliyada & degnaashaha shacabka hay'adda nabad geliyada waxey awood u leeyihiin iney joojiyaan tartamadaas iyo shineemooyiinka

## Qod.49aad

## Furashada Goobaha Maadeysyada iyo Madadaalada.

1. Lama furi karo Goobahaas ayadoo aan fasax laga haysan Guddoomiyaha degmadda oo tixraacaya ogolaasho gudi farsamada ka mid ah oo guddoomiyaha gobolka magacaabay , hadii aysan astaan helin si degan cafimaad waxey soo jeedinayaan in goobtaas laga bedelo bandhigyadda.
2. Qarashka Baarista e ku yaala qeybaha hore waxaa bixinaaya cida soo weydisatay
3. Guddoomiyaha degmadda waqti kasta wuxuu awood u leeyahay inuu baaro goobahaas si uu u xaqiijiyo inaan isbedel ku imaan.
4. Kuwa ku xad gudba amarada sare ku qoran waxaa lagu ciqaabayaa 6 bilood xarig ah ama 1000 sh, so oo ganaax ah.

## Qod. 50aad

## Kuwa ku dhiga banaanada Filimada

1. Cidkasto oo dooneysa inay ku dhigto filimada meel banaan ah ama dadweyne isugu yimadaan waa iney ogeysiiyaan guddoomiyaha degmadda.
2. Kuwa ku xad gudba Qodobadaan waxaa lagu ciqaabayaa 1000-5000 sh, so oo ganaax ah hadii aan fulku keeneyn dambi ka weyn midkaan

## Qod. 51aad

## Dad’da ka yar 15 sano oo wax ka dhigaayo filimadda & riwaayadaha

1. Da’yartaas howlshaas wax ka qabaneyso oo da’doodu ka yartahay 15 sano waa in liiskooda oo tafaftiraan loo soo gudbiyaaa Guddoomiyaha degmadda ayadoo lala socodsiinaya gudiga ku tilmaaman, Qod. 45aad

2. Gudigu waa ka jooji karaan ka qeybgalka howlshaas dadka da’doodu ka yartahay 15 sano
3. Dadka ku xad gudba qodobkaan waxaa la xiri karaa 6 bilood xirig ah ama 1000 sh,so oo ganaax ah.
4. Kuma jiraan dadka sharcigaanu qebanaayo kuwa sameya Filimada gar-gaarka & waxbarashada.

**Qod.52aad**

**Ilaalinta Goobaha Ganacsiga**

- Hay’adda nabad geliyada guud waxa waajib ku ah iney ilaaliyaan goobaha ganacsiga oo ku dhisan sharciga lehna shati maamul oo sharciga siiyey si loogu dhowro iney ilaaliyeen ka ganacsigooda loo fasaxay & waqtigii loo xadeyey inay fureen iyo inay xireen goobahaas.

**Qod.43aad**

**Ciyaaraha La fasaxay.**

- Goobaha Ganacsiga waa in lagu dhejiyaa tabeelo ay ka muuqdaan magacyada ciyaaraha aan la ogleyn waana inuu soo saaro Taliyaha saldhiga Booliska magacyada

**Qod. 54aad**

**Diiwaanada laga rabo Hoteelada**

1. Dadka iska leh hoteelada meelaha laga dego oo laga kireysto uu lacagta ku qaato waa inay leeyihiin diiwaan oo ay ka muuqato qofka soo degay meesha uu ka yimid iyo cida la degneyd.
2. Diiwaankaas waxaa loo heynayaa hay’adaha nabad geliyada marka ay u baahdaan.

3. Cidii ku xad gudubto waxey mateysaneysaa 3 bilood xirig ah ama 3000 sh, so oo ganaax ah.

**Qod.55aad**

**Caruurta Derbi Jiifka ah.**

- Da'yarta caadeystay Tuugsiga & Derbiyo jiifka waxaa laga rabaa hay'adda nabad geliyada inay uruuriyaan, kuna raadiyaan waalidkooda & qaraabadooda kuna dhiiri geliyaan inay wax baraan xafidaan Aqlaaqdooda ilaaliyaan.

**Qod.56aad**

**Ku xereynta meelo lagu xanaaneyo oo lagu edbiyo hadii tilaabooyinka Qodobka hore ay shaqeyn waayaan.**

- Hay'adda nabad geliyada waxay maxkamadda waydiisan karaan in caruurtaas la geeyo meelo dhaqan celin ah.

**Qod.57aad**

**Tilaabooyinka Ciqaabeed**

- Marka laga soo tago 2 qadob ee hore qoftasta oo ay waajib ku tahay xanaaneyn u kalmeynta da'yartaas sharciyan oo u gudan waayaa waajibaadka ka saaran hay'adaha nabad geliyada waxey dacwadiisa u gudbinayaan garsoorka si loola tiiksado sharciga ciwaabta mus'uulkaas.

**Qod.58aad**

**Waajibaadka ururada nooc -kasto oo ay yihiin Qasadkooda.**

1. Urur-kasto noociisa qaabkiisa & qasadkiisa waa inuu qoraal ugu gudbiyaa Guddoomiyaha Gobolka.

- ✓ Xeerka uu ku  dhisan yahay
- ✓ Magacyadda Howlaha u gaar ah.
- ✓ Qodobka u dhisan yahay
- ✓ Cidda dhistay
- ✓ Xaruntiisa Guud & kuwa Degmooyiinka

2. Ogaysiintaas  waa in la gaarsiiyaa muddo Bil gudaheeda ah Hay’adda ay khuseyso
3. Waa qasab inay ogyihiin ayaguna ku aas-aasay kuwa ka shaqeeya & wakiiladoodu
4. Isla waqtigaas oo kale waa in la ogeysiiyaa wixii is bedel ah ee ku yimaada ururka ama bedelasho xarunta guud
5. Waxyaabaha ku qoran qeybaha hore ee Qodobkaan, hadii la aqoonsado jiritaankooda waa la sharciyeynayaa.

## Qod. 59aad

## Ka Dirida Howlada Ururada

1. Ururkasta noociisa iyo Qasadkiisa hadii ay nabad geliyada guud wax dhimayaan ama aqlaaqda bulshada Guddoomiyaha Gobolku wuxuu awood u leeyahay inuu Qoraal ahaan u joojiyo .
2. Hadii xaalado deg deg jiraan liiska hore waa u digi karaa Guddoomiyaha Gobolka,  & madaxda ururadaas inay dhowraan sharciga.

## Qod.60aad

## Kala Dirida Ururada ku Xad Gudba Qod.12aad Ee Dastuurka

- Ururka nooc-kasta oo ay yihiin & sabab-kasta oo loo dhisay hadii ay ku xad gudbaan Qod.12aad ee dastuurka waa la kala dirayaa ayadoo go’aan yar oo ay soo saarto ay ka codsanayaan Hay’adaha Nabad geliyada.

## Qod. 61aad

## Kala Dirida Ururo kale.

- Marka laga soot ago kuwa ku xad Qodobka Qod. 12aad Ee Dastuurka ururada u dhisan kuwa wax u dhimaayo arimaha nabad geliyada & Aqlaaqda.
- Waa la kala dirayaa ayadooWasiirka Arimaha gudaha soo saaraayo wareegto soona marinaayo Golaha Wasiirada.

## Qod. 62aad

## Ciqaab Saarida.

1. Kuwa ku xad gudba amarada ku qoran Titolahan hadii aan dambi ka weyn ka dhelan waxaa lagu ciqaabayaa 6 bilood xirig ah ama 1000 sh. so oo ganaax ah.
2. Cidii ka cabanaysa Go’aanada ku qoran qodobada 59-61 aad waxey cabasho u qoran karan Maxkamadda sare ayagoo sharciga raacaya.

## Qod. 63aad
## U Fasaxida

- Shirkadaha & Hay’adaha gaarka loo leeyahay waxey qoran karaan ilaalo u gaar ah,
- Sabab macquul darteed kuwaas oo ilaaliya hantidooda guurtada ah & ma guurtada .

**Qod.64aad**

**Dhismahooda**

- Shirkadaha & hay’adaha gaarka loo leeyahay eek u xusan Qodobka hore waa hubeyn karaan ilaaladooda rayadka ah mudda ay shaqadooda u taagan yihiin sababtoo ah hay’addu waxay leedahay shatiga haysashada hubka.

**Qod.65aad.**

**Dharkooda iyo Calaamadahooda gaarka ah.**

- Ilaalada gaarka ah waxaa waajib ku ah iney qaataan dhar u gaar ah & calaamado ay ogyihiin hay’adaha nabad geliyada guud waana iney qaataan warqada aqoonsiga, oo ay siiyaan hey’adaha nabad geliyada.
- Kadib marka la xaqiijiyo howlahaas

**Qod. 66aad**

**Dabagalka dhinaca amaanka, Aqlaaq wanaaga ilaalinta Dabagalka**

1. Hay’adda nabad geliyada haday ogadaan qof inuu dambi fale yahay ama han-dadaayo aqlaaq ahaan nabad geliyada guud ama mida gaarka ah , waxey awood u leeyihiin iney u soo jaraan ama weydiyaan damaanad ama warsadaan hey’adaha sharciga in kor laga ilaaliyo qofkaas waana inay ka diyaariyaan warbixin loo gudbinaayo Maxkamadda Gobolka oo deegaankiisa ku talaala.

2. Maxkamaddu markey dhageysato xeer ilaalinta soo jeedintooda & cadeymahaas la horkeenay sida uu qabo X.H.C. waxey soo saareysaa xukun ay u fariisatay oo ruuxaas damaanad loogu dhigaayo ama in kor laga ilaaliyo xukun ah, muddo cayiman, ama aan la cayimin, ama wey diidaysaa
3. Xukunkaas waa laga qaadan karaa racfaan si nidaam ah.

## Qod. 67aad

## Qaabka Damaanada loo qaadaayo & dabagalka loo sameynaayo.

**1.** Damaanada Aqlaaq wanaaga waxaa la dhigayaa qeybta canshuuraha dowlada taas oo u dhiganta qiimaha dhaqaalaha qofka laakiin aan ka yareyn 1000-50.000 oo sh so si qofkaas amaan looga helo.
**2.** Haduusan qofka wax haysan waxaa la saarayaa ilaalo dabo joog ah
**3.** Daba galkaas mudadiisu Kama badan karto maalinta la saaray ka bilaabata.
**4.** Waqtigaas qofka loo qabtay oo kor laga ilaalinayo haduusan qofkaas dambi kale gelin, maxkamadda waa ka baabineysaa waxeyna u soo celineysaa aminnimadiisa waxaana laga dhaafi karaa kor ka ilaalinta hadii uu dambi galo mudadaas lacagta damaanada oo ka tiil waa lala wareegayaa asagon xiran ayaana la soo dacweynayaa.

## Qod. 68aad

## Qaab Ciqaabeedka

- Cidkasto oo diida ama daahisa lacag dhamaanada ah oo ay weydiisay Maxkamadda oo keeni waayo waxaa lagu ciqaabayaa 3 bilood oo xirig ah iyo ganaax dhan lacagtii laga doonaayey.

## Qod.69aad

## Kala wareegid hanta

1. Marka laga soot ago Qodobada hore hadii cidii gasho dambi dhameystiraan ama qof naftiisa halis galiso ama weerar ku ah noloshiisa oo ay cadaato sababo halis keenayaa, oo Qatar ku ah Nabada geliyada guud, hay'adaha nabad geliyada waxey awoodi karaan iney xoolo nool ka qabtaan qofkaas ama hanta kale oo ma guurto ah oo u dhiganto magdhow.
2. Hadii la waayo arimahii la dabo socday hay'adaha nabad geliyada waxey qofkaas u celinayaan hantidiisi
3. Labadaas dhinaca marka laga soo tago hay'adda nabad geliyada waa in ay la socodsiiyaan talaabo walbo oo ay qadayaan ,hay'adaha garsoorka oo awood u leh faldambiyeedkaas
4. Arimaha ku qoran qeybta 1aad & 2aad,ee qodobkaan waxaa la heer dhisi karaa hay'adaha garsoorka inta galdacwadeed laga soo sameeyo ayadoo uu soo codsanaayo xeer ilaaliyuhu.
5. Labada dhinac ee baritan ka dhaxeeyso sida ay ugu soo gudbiyeen hay'adaha Nabad geliyada guud.

## Qod.70aad

## Xuku deg deg ah

1. Hadii ayu jirto Qatar nabad geliyada guud ama mid masiibo ama Qatar dagaal waxaa lagu dhawaafi karaa xukun deg deg ah
2. Xukunka deg deg ah waxaa lagu soo sarayaa Dikareeto Madaxweynaha Jamhuuriyadda kadib soo jeedinta wasiirk arimaha gudaha iyo ogolaasha goloha wasiirada islamaalintaasna waa in la ogeysiiyaa golaha shacbiga.
3. Golaha shacbiga haday fadhiyaan waa iney ku ogolaadaan muddo 30 maalmood gudahooda, hadii kala maqan yihiin 3 maalmood maalinta ugu horeysaa fadhigooda.

## Qod.71aad

## Fulinta xukuna deg deg ah

- Mudada xukunka deg deg ah , wasiirka arimaha gudaha wuxuu u fasaxayaa guddoomiyaha gobolka ayadoo qoraal ah,

- ✓ {A} inuu xadeeyo dhaq dhaqaaqa isu imaashaha boragaraamka kicinta bulshada si looga tago nabad geliyada xuno qatarka bulshada.
- ✓ {B} in la xiro Lana baaro dadka guriyahooda kuwa la soo tuhmaayo dambiyo keeni karo nabad geliyo xumo & Qatar amaan
- ✓ {C} in lala wareego qalab iyo hinti loo maleynaayo iney dhib u keeni karaan socodka nabad geliyada waa in loo gurmadaa shacbiga qataruhu soo gudboonadaan maalkooda iyo naftooda
- ✓ {D} waxaa lagala noqon karaa fasaxa haysashada hubka iyo wax yaalaha kale oo amaanka wax u dhimi karaa.
- ✓ {E} shacab iyo melateriba waa iney ka qeyb qataan gurmadkaas xataa hadii uu ka duwan yahay howlahooda.

2. Howlahaas oo dhan oo ku qoran qaybaha hore waxaa u xil saarnaa ciidamada booliska hadiisa xaalka ku xumaado ama ka awood bato waxey kaashanayaan ciidamada X.D. S.

## Qod.72aad

## Xalaalaynta go'aanada xoriyada ka qaadista Baarista

1. Go'aanadaas la xariir arimaha nabad geliyada iyo wixii la qabtay waxaa loo gudbinayaa Maxkamadda awooda u leh si ay u soo xalaaleyso xariga iyo barista la sameynaayo mudo 30 cishu gudahood
2. Hadii ay jiraan dacwado la xariira dambiyo dhacay waa la xalaaleynayaa si looga hor tago Qatar iyo nabad geliyo xumo mudo 90 beri gudahooda waxaana awoodaa leh Maxkamadda gobolka.
3. Go'aankaas maxkamadda racfaan looga qaada karaa maxkamadda sare sida sharcigu qabo

## Qod. 73aad

## Go'aan Ciqaabeedka

- Hadii aan dambi ka weyn imaan cida ku xad gudubta xukun deg deg ah eek u xusan Qod.71aad, waxaa lagu ciqaabayaa hal 1 sano oo xirig ah ama 10’000 oo ganaax ah

**Qod.74aad**

**Waqtiga Dagaalka**

1. Waqti dagaal waxaa ah marka madaxweynaha jamhuuriyadda ku dhawaaqo baarlamaankuna si sahal u ansixiyo.
2. Waqtiga dagaalka dowlada ayaa la wareegaysa howlaha dalka iyo wax kasto awood sharciga u fasaxaayo.

**Qod.75aad**

**Ku xad gudub xeerkaan.**

- Cidkasta oo ku xad gudubta xeerkaan hadii aan tilmaameyn in la saaro ciqaab gaar ah waxaa la xirayaa 6 bilood & 1000 sh. So oo ganaax ah.

**Qod.76aad**

**Tirtirid**

- Waa la baabiyey sharci kasta oo ka soo horjeeda xeerkaa

**Qod.77aad**

**Qaanuun ahaan**

- Dowlada waxey awood u leedahay qanuun lagu fulinaayo sharcigaan ama xeerkaan

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya**

**Aadan cabdulle Cusmaan**